

# Qiimayn Developmental Disabilities Administration

## Macluumaadka shakhsiyadka naafada ah

### Waa maxay Qiimaynta DDA?

Qiimaynta Developmental Disabilities Administration (DDA) waa koox su'aalo ah kuwaasi oo maareeyaha kiiskaagu uu ku waydiin doono si ay uga caawiso go'aanka taagyeerada aad u baahan tahay. Waa hab lagu caawiyo in DDA ku qabo shaqada ugu fiican adiga.

### Waxa jira saddex qaybood oo ah Qiimaynta DDA:

1. Qaybta koowaad ee qiimayntu waxa ay waydiisaa su'aalo ku saabsan taagyeerada taasi oo aad u baahan tahay si aad ula noolaato bulshada iyo inaad ka qayb qaadato hawlaha uu qof kastaa qabto.
2. Qaybta labaad waxa ay waydiisaa su'aalo ku saabsan caawinta taasi oo aad uga baahatay daryeelka shakhsiga iyo hawlaha nolol maalmeedka sida cunidda, maydhashada, labisaadda, iwm.
3. Qaybta saddexaad waa qorshaha kaasi oo sharaxaya taagyeerada iyo adeegyada aad heli doonto iyo cidda ku siinaysa taagyeerada.

### Goorma ayaan heli doonaa Qiimaynta DDA?

Waxa aad heli doontaa qiimayn kahor inta aanad bilaabin adeegyo ka helida Developmental Disabilities Administration. Haddii aad mar hore helaysay adeegyo, waxa aad lahaan doontaa qiimayn cusub sannad kasta.

### Muxuu Maareeyaha Kiiskaygu u isticmaalaa Qiimaynta DDA?

DDA waxa ay doonaysaa inay waydiiso qof kasta su'aal isku mid ah. Maareeyayaasha Kiisku waxa ay isticmaalaan koombuyuutaro si ay uga caawiso xasuusinta inuu waydiiyo dhammaan su'aalaha muhiimka ah uuna helo jawaabahaaga oo qoran. Tani waxa ay ka caawin doontaa DDA inuu hubaal ka dhigo in awoodaha qof kasta lagu qiyaasay si isku mid ah shayna lagama tagin.

### Maxay iila macna tahay aniga?

Qiimaynta DDA waxa ay ka caawin doontaa Maareeyaha Kiiskaaga inuu barto waxa ay awoodahaagu yihiin iyo waxa aad u baahan tahay si lagaaga caawiyo qorshaha mustaqbalka.

### Ma guul daraysan karaa?

Maya, ma guul daraysan kartid. Qiimaynta DDA waxa ay ku saabsan tahay adiga iyo awoodahaaga iyo baahiyahaaga. Ma jiraan su'aalo saxsan ama qaldan, jawaabahaaga uun.

### Waa sidee haddii aanan fahmin su'aalaha?

Waxa aad haysan kartaa qof kula jooga kaasi oo kaa caawin doona inaad ka jawaabto su'aalaha. Waxa aad dooran kartaa qofka uuna noqonayo. Haddii aad haysato ilaaliye, qofkaasi waa lagu casuumi doonaa inuu joogo kulanka sidoo kale.

---

## **Intee in le'eg ayay qaadan doontaa?**

Qiimaynta DDA waxa ay qaadataa badanaa 2 ilaa 4 saacadood. Haddii ay kugu qaadato in badan adiga, waxa aad waydiisan kartaa Maareeyaha Kiiskaaga inuu qayb qabto maalin qaybta kalena maalinta kale.

## **Waa sidee haddii aanan ka jawaabin su'aalaha?**

Waxa aad dooran kartaa inaad ka jawaabin su'aalaha, laakiin hadaad doonayso inaad adeegyo ka hesho DDA, adiga iyo wakiilkagu waxa aad u baahan doontaan inaad ka jawaabtaan.

## **Maxaa dhacaya kadib marka aan ka jawaabo su'aalaha?**

Kadib marka aad ka jawaabto su'aalaha, Maareeyaha Kiiskaagu waxa uu kaa caawin doonaa inaad qorshe samayso sannadka soo socda. Qorshuhu waxa uu sharixi doonaa adeegyada iyo taageerooyinka kuwaasi oo aad heli doonto iyo cidda ku siin doonta taagyeerada. Maareeyaha Kiiskaada waxa uu ku siin doona nuqulka qorshahaada.

## **Waa sidee haddii aanan jeclaan qorshahayga?**

Maareeyaha Kiiskaagu waxa uu kuu sharixi doonaa inaad haysato xaq aad racfaan ku qaadan karto, macnaheeduna yahay inaad qof u sheegi karto waxa aad oggolaan wayday qorshaha. Qofk dib u eegaya racfaanku waxa uu go'aamin doonaa waxa ku xiga ee dhacaya.

## **Waa sidee haddii baahiyahaygu isbaddelaan?**

Haddii baahiyahaagu is baddelaan, wac Maareeyaha Kiiskaaga si uu u muddeeyo wakhti la wadaago macluumaad cusub.

## **Waa sidee haddii aan haysto su'aalo ku saabsan Qiimaynta cusub ee DDA?**

Wac Maareeyaha Kiiskaaga ama booqo websaytka Qiimaynta DDA:  
[www.dshs.wa.gov/ddd/CAP.shtml](http://www.dshs.wa.gov/ddd/CAP.shtml)